


“ISHA CUMAR KA LULATA”

Kaydka sheeko-dhaqameedka

Caliqeyr M. Nuur

07 Jan. 2023

Waxaan qormadan ku eegi doonnaa waxtarka sheeko-dhaqameedka iyo baahida loo qabo kaydinteeda. Waxaan tiirdhexaad uga dhigan doonnaa buugga “*Isha Cumar ka lulata*” ee uu qoray Dr. Georgi L. Kapchits oo u dhashay dalka Ruushka, balse xeeldheere ku ah afka iyo dhaqanka Soomaaliyeed.



Xogta guud

“*Isha Cumar ka lulata*” waxaa lagu dhigay boqol iyo toddobaatan sheeko Soomaaliyeed oo xul ah. Waa laba-afle – Soomaali iyo English. Dabayaaqadii 2022 ayay madbacadda Hiil Press ka soo saartay dalka Masar. Tirada bogaggiisu waa 306.

ISBN: 978-1-63649-796-9

ARAR

Hibada ka muuqata afka iyo suugaanta Soomaalidu waa dhaxal guun ah, balse welwel laga muujinayo. Sida ay indheergaradka wax qoraa u badiyaan, waxaa afkan ku socda hoos-u-dhac la eersanayo weerar kaga imanayo afaf qalaad oo xooggan, sida Ingiriiska iyo Carabiga. Raad kale oo tabanna waxaa ku leh noloshii miyiga oo gabaabsi sii ah, waana halkii laga heli jiray quruxda iyo tahanka erayada. Lama oga in uu afkani iska caabbin doono gembiga lagu hayo; in uu awoodeysan doono ama in uu gedman doono intaba. Waxaase la hubaa in uu burburkiisu ka dhigan yahay ambashada falsamada dadkeennii hore iyo murti ka dhuroowday kumanaan gu' oo waayo-aragnimo ah.

Maanta waxaa aloosan loollan adag oo u dhexeeya baylihinta iyo badbaadinta afka. Waxaa miisaanka labada dactal ka kala saaran labo is diiddan oo kala ah:

- Bidix: Hay'adaha waxbarashada dalka oo intooda badan maadooyinka aasaasiga ah ku dhiga af qalaad. Sidaas oo kale, hay'adaha maamullada Soomaalida oo badanaa xiriirkooda ugu mudan ka dhigta afaf shisheeye, sida Ingiriis, Faransiis, Carabi iwm.
- Midig: Qorayaal madaxbannaan iyo ururro ama madbacado wax daabaco oo u geyfan soo-saarista, faafinta, horumarinta iyo weliba abuurista baraarug ah in uu afkii gedmanayo. Waxay ku dadaalaan inay xoojiyaan oo baraxtiraan adeegsiga af Soomaaliga.

Georgi Kapchits oo ah qoraaga "*Isha Cumar ka lulata*" isagu wuxuu gelayaa qolada midig. Haddii aan waxqabadkiisa kormarno; wuxuu barashada af Soomaaliga bilaabay 1964, isaga oo ku qaatay shahaadada PhD. Kow iyo toban buug ayuu suugaanta Soomaaliyeed ka qoray iyo maqaallo cilmiyeed oo kala jaad ah, golayaal badan oo caalami ahna afkan ayuu ku metalay. Inta badan buugtiisu waa dhaxalgal uu ku kaydiyay suugaan iyo murti aan dhumitaankeeda laga cayman lahayn. Hormuudka buugta uu af Soomaaliga ka qoray, kuna qoray waxaa ka mid ah:

- *Faaliyihii la bilkayday — A Soothsayer Tested*. Moosko. 2006. Wuxuu ku dhigay 115 sheeko-dhaqameed oo ku qoran af Soomaali iyo af Ingiriis.
- *Hubsiiimo hal baa la siistaa — To know something for sure one would even part with a she-camel*. Moosko. 2002/ Riga 2016. Wuxuu ka kooban yahay 658 maahmaah oo ah kuwa ugu caansan murtida Soomaaliyeed.

- *Isha Cumar ka lulata —The Knocked-Out Eye of the Hyena*. Qaahiro. 2022. Waa koobe lagu dhigay 172 sheeko-dhaqameed.
- *Qaamuuska Casriga ah ee Maahmaahda Soomaaliyeed — A Modern Dictionary of Somali Proverbs*. Katrineholm. 2020. Waxaa lagu kaydiyay 5000 oo maahmaah oo intooda badan ah af Soomaali iyo English isla gudboon.
- *Sentence particles in the Somali language and their usage in proverbs*. Aahen. 2005. Buug uu ka qoray unugyada jumlada af Soomaaliga, waa qormadii uu ku qaatay shahaadada PhD.

Kaydka sheeko-dhaqameedka

Georgi wuxuu buuggan “Isha Cumar ka lulata” ku dhigay 172 sheeko oo ah kuwii caanka ka ahaa Soomaalida dhexdeeda, balse la moodo in ay beryahan ka sii guurayaan xusuusta bulshada. Sida uu qoraagu qabo “*Sheekooyinka Soomaaliyeed ee hiddaha ah waxaa loo kala qaybin karaa ugu yaraan shan jaad. Waxay kala yihiin: sheekooyin mala-awaal ah – mythological tales, sheekooyin xayawaan – animal tales, sheekaxariirooyin – fairy tales, sheekooyin sooyaal ah – legends, iyo sheekooyin murtiyeed – novelistic tales*” (Kapchits, b. 12). Qayb kastaba wuxuu ka soo qaadanayaa intii uu u arkay mudanka, isaga oo ku qoraya hadba sidii loogu weriyay afguriyadii uu tixraaca ka helay.

Sheekooyinka intooda badani waxay xambaarsan yihiin farriimo anshaxa la xiriira, kuwana waa sooyaal qofeed, halka ay qaarkood yihiin hal-abuur barax la’, balse leh farriimo dahsoon. Inkasta oo Afrika lagu sheego dherebtii aadanaha iyo isha ay ilbaxnimo kastaaba xididkeedu galo, haddana sheekooyinka Soomaalida waxaad mooddaa biladdaye ay dunidu iska wada dhex arki karto. Isu-ekaanshaha sheekooyinka hiddaha ah ee dadyowgu waxay muujinaysaa xiriirka qotoda dheer ee la wadaago, sidii la doonaba ha loo kala fogaadee. Masaafada dhuleed ee dalalka iyo qaaradaha u dhexeysaa marnaba saamayn kuma yeelan fikir-wadareedka aadanaha, sida hal-abuurka sheekooyinka, heesaha codka loo qurxiyo iyo in suugaantoodu u kala baxdo laamo isku mid ah.

Bal arag sheekada “Daldaloole” (b. 15) oo ka hadlaysa sidii ay cirka iyo dhulku ku kala durkeen. Sida ay sheekadu werinayso, berigii hore cirka iyo dhulku way isku dhowaayeen, se wuxuu cirku fogaaday markii ay naago badar tumayo ku dulduleeliyeen tibtii ay badarka ku kalootinayeen. Qorraxda, xiddigaha, bisha, dabeylaha iyo saamaynta cimiladuna waxay ka soo dusaan meelihii berigaas cirka laga duleeliyey. Waa sheeko qurux badan oo maanka ilmaha uga filnaan karta

weyddiimaha la xiriira abuurka jiraanka. Maantooleydaas oo kale waxaa qaba Reer Ghana, qabiilka Ashanti. Halkan, “Onyankopon” oo ah ruuxaan ay weyneeyaan, balse ku jirta halkii “Daldaloole” ayaa ku noolayd meel dadka madaxooda la siman. Cirka ayaa gogol u ahaa. Waagii dambe ayay naag badar tumaysaa dhowr jeer tibtii ku mudday. Sidaas buu Onyankopon cirkii u qaatay oo meel fog la tegay. Sheekadan qaybteeda dambe ayaad mooddaa inay ku xirmayso tii Soomaaliyeed ee “*Awrka Cirka*” (b. 17) oo Soomaalida dhexdeeda caan ka ah. Reer Ashanti si ay cirkii fakaday u soo celiyaan ayay wixii mooye carriga yiil oo dhan is dulsaaranayaan, balse hal mooye ayaa ka maqnaanaya si ay cirka u gaaraan. Kolkaas bay naagtii talada-xumayd mooyihii u hooseeyey soo bixinaysaa si ay dadkii kore ugu dhiibto. Halkaas bay dadkii oo dhammi hoos u daadanayaan. Xagga Soomaalidana, markii la arkay awr cirka ka muuqda ayaa la doonay in la soo boojiyo. Dadkii ayuu qofba qof kale ku dul istaagay ilaa la gaaray awrkii cirka. Kolkaas buu ninkii ugu sarreeyey wuxuu dalbanayaa in loo soo dhiibo hoggaankii uu awrka ku qammisi lahaa. Dalabkaas kaddib, ninkii dadka ugu hooseeyey ayaa rogonsanaya si uu xarigga u soo qabto, sidaas bay dadkii oo dhammi dhulka ugu soo hoobanayaan.

Inkasta oo ay Soomaalidu geela iyo ragga wada xiriiriso, taasina ay noqon karto sababta ay raggu dhacdadan u jilayaan, haddana gefafkii abuurka adduunyada la xiriiray ayay sidii Ashaantiga oo kale dumarka ku eedeeyeen.

Marka laga yimaaddo sheekooyinka hal-abuurka ah, waxaa iyaguna jira kuwa la xiriira sooyaal qofeed. Kuwa i soo jiiday ee haddana ay bulshooyin kale Soomaalida la wadaagaan waxaa ka mid ah taxanaha Carraweelo. Waa boqorad arxan darnayd oo ragga dhufaani jirtay, kuna qaybtay hawlihii ay dumarku qaban jireen, sida cunto-karinta, falkinta, cugitaanka iwm. Sida ay Soomaali badan qabaan, Carraweelo waxay ahayd run, halka ay qorayaashii Drake-Brockman iyo Ralph buuggoodii “*British Somaliland*” (b.169) ku xuseen in Carraweelo ahayd Habarjelo oo ah beel Soomaaliyeed. Qowmiyadda Siidaamo ayaa iyaguna leh halyeeyad dumar oo la oran jiray Furra. Sida ay qoreen Markos Tekle (b. 67) iyo Seyoum Hameso (b. 16), Furra waxay ahayd Siidaamo, qabiilka Hawella Gadire, waxayna ku hilaadiyeen in ay talinaysay toddoba gu’ oo qarnigii 15aad ah.

Murtida ay dumarka Soomaaliyeed adeegsadaan ee ah “*burcadka iyo hilibka ceerriinba ragga lama tuso, oo markii la shiilo way yaraan, kolkaas bay is oran iyada ayaa cuntay*” waxay Siidaamadu tiraa waa dardaaran ay Furra dumarka siisay. Furra iyo Carraweelo labaduba waxay colleysteen ragga indheergaradka ah, wayna laayeen. Gaar ahaan, Furra waxay dili jirtay odayada, ragga bidaarta leh iyo kuwa gaaggaaban oo ay caqli dheeri ah ku tuhmaystay. Labadoodaba waxaa ka badbaaday laba oday oo raggii xilligaas joogay ay qarín jireen si ay ula tashadaan kolka ay boqoraddu xujayso. Furra waxay sababsatay talo uu lahaa

oday gaaban oo bidaar leh, Carraweelo iyaduna waxay eersatay dhagarta oday la oran jiray Biiqaa. Soomaalida iyo Oromada, labaduba waxay leeyihiin goobo la yiraa waa xabaashii Furra ama Carraweelo. Maadaama ay labada qowmiyadoodba yihiin Kooshin (Cushitic), waxay noqon kartaa sooyaal la wadaagay ama sheeko layska amaahday. Waase arrin uu dabagalkeedu xiise leeyahay.

Boqol iyo todobaatanka sheeko ee uu Georgi buuggan ku ururiyey waxaan u arkay kayd dahab ah. Waxay xambaarsan yihiin taariikh bulsheed, balse inteeda badani dahsoon tahay, ama waano ayaa ku sugan oo murti nololeed ayay salka ku hayaan. Af iyo suugaan la'aan, ma suurowdeen in jiilba jiilka ka dambeeyo u gogolxaaro, una reebo ilbaxnimo iyo sooyaalka tabihii ay ku guuleysteen. Hubaal, si uun bay noloshu macne u yeelataa marka lagu laro dhurtii ka soo baxday waayihii la soo maray. Dhurtaasna waxaa lagu weeleeyaa sheekooyinka oo marka ay ugu wanaagsan yihiin samaha nagu boorriya, xumaantana naga reeba, marka ay ugu yar tahayna aan ka helno xog ifinaysa sooyaalka arrin xiiso gaar ah noo leh.

Haddii si habaysan loo qaabeeyo, sheeko-dhaqameedka waxaa loo adeegsan karaa barbaarinta ilmaha si loogu ilaaliyo dabeecadaha wanaagsan. Intooda badan sheekooyinku waxay weriyaan arrimihii laga dhaxlay go'aan kas loo qaatay ama fal aan laga fiirsan. Sida sheekada ridii aragtay dawacadii ceelka ku dhacday. Kolkii ay warsatay sababta ay ceelka ugu jirto ayay dawacadii ku tiri "biyaha hoose ayaa ka qabow kuwa aad halkaas sare ka cabi karto ee kaalay" Ridii iyada oo aan ka fiirsan bay ceelkii dalaq tiri. Markii ay biyihii ka wabaxdayna waxay ka welweshay sidii ay uga bixi lahayd. Dawacadii ayaa tiri "Xarig ayaan hadhow kuu soo tuurayaa ee aan dhabarkaaga ku istaago oo banaanka u baxo." Ayaandarro, kolkii ay dawacadii sidaas bannaanka ugu baxday ayay ridii ku tiri "Intaadan falin ka fiirso", wayna ka dhaqaaqday. Tani ma aha sheeko uun, balse waa waano ilmaha loogu sheegayo in uu ka fekero waxa u muuqda, waxa kala gudboon iyo waxa falkiisaas ka dhalan karo.

Sida uu Georgi buuggiisa ku yiri "*Sheekooyinka ku qoran af-Soomaaliga waxaa loogu talaggalay dhallinyarada Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa qurbaha jooga ee ka go'an suugaanta hiddaha ah ee jiilalkii hore laga dhaxlay...*" (b.11). Haddana dhanka kale, maadaama buuggu laba afle yahay, wuxuu soo bandhigay wixii ay bulshada afkan ku hadashaa adduunka ugu deeqi kartay. Sow dulqaad uma yeelateen qolo aad suugaantooda jeceshahay? Waa sidaas, suugaan is weydaarsigu door weyn ayuu ka qaataa isu-soo-dhowaanshaha bulshooyinka kala haybta ah. Inkasta oo uu qoraagu adeegsaday erayga "*dhallinyarada*" haddana, aragtidayda, murtidani waa mid aanu seeraheedu da' lahayn oo heer kastaaba anfacaysa.

Weligeedba, doorka sheekadu ma aha oo qura dadka ifka jooga, waxay aqoonyahanka cilminafsigu tibaaxaan in xitaa ay waxtar u leedahay uurjiifka – ilmaha aan weli dhalan. Dad badani maangal uma arkaan in ilmo caloosha hooyadood ku jiro loo sheekeeyo. Balse “*marka aynu ku hadalno erayo diirran, hufan oo ay deeqsinnimo weheliso, waxay kobciyaan maskaxda iyo qalbiga uurjiifka, filashaduna waa in ay hadhow yeeshaan astaamahaas wanaagsan*”. (Nancy, b. 90). Si taas ka duwan, waxaa jirta rumayn diimeed oo ah in uu qof kastaba aakhiro heli doono samaantii uu adduunyada uga tegay. Taas ujeedkeedu waa in qofkii curiyey ama faafiyey sheeko wanaagsan oo nolosha dadka anfacyso uu aakhiro faa’iideeda helayo. If iyo iilba, wanaaggu seere ma leh.

Haddii ay Soomaalidu ahayd bulsho afkeedu hodon yahay, ama lagu sifayn jiray bulsho gabyaayo ah, maanta gabbalkaasi wuu sii janjeeraa. Waxaa jirta awood shiiqinaysa oo dhanka sare ee dawladda iyo dhanka hoose ee shacabkaba kaga imanayso. Mahad weynna waxaa mudan dadka aqoonta iyo hawl karnimada muujiyey ee afkan ku adeegsaday qoraal, ama sooyaalkiisa wax ka qoray. Sababta oo ah “*afku waa aqoonsi iyo astaan laysku haybsado, dadkana lagu kala garto, waana dhaxal awoowe oo aanay jirin cid ay daw ku tahay in ay ka qaddo*” (Aw Cabdiqani, b. 123).

Afrika waxaa loo og yahay sida ay hodon uga tahay khayraadka dabiiciga ah. Waxaa la yiraa ‘waa dambiishii cuntada dunida’, waxaana baahay halhayska qurbajoogta iyo dadka uu firkoodu qaaraddan ka soo jeedo ee ah “*Mustaqbalku waa Afrika*”, balse sidee u ekaan karaa muqtaqbal aan af qumman lahayn. Dabcan, benii-aadnimada iyo afku kalama geyoodaan, waase muhiim in waxa la hayana la dhowro, waxa soo socdana gogolxaar san loo sameeyo.

Gunaanud

Waxaan qormadan uga soo hadalnay doorka ay sheekadu uga jirto nolosha bulshada iyo waxtarkeeda. Welwelna waxaa looga muujiyay baylahdeeda iyo weliba hoos-u-dhaca guud ee af Soomaaliga haysta. Georgi L. Kapchits oo sanadkan u dabbaaldegay 83-jirnimadiisu wuxuu afkan u galay abaal weyn oo mudan qiraal heer sare ah. Wuxuu noloshiisa oo dhan u baaliday raadraaca iyo soo-saarista sheekooyinka iyo maahmaahda Soomaaliyeed oo uu ka soo saaray dhiganayaal iyo qormooyin tiro iyo tayo leh. Ma oranayo: “Meeday billaddiisii?” Waxaanse filayaa in ugu yaraan dhug loo yeesho dhaxalka uu u hedladay iyo kaydka uu nooga tegayo. Nin maqan tebidii waa nin jooga ceebtii!

Tixraac

Aw Cabdiqani Xasan (2021) Muxumed. *ABABINTA TOOSAN — Tala kugu hagaysa barbaarinta san ee ilmaha*. Stocholm.

Caliqeyr M. Nuur (2022). *Abtirsiiinta Erayga af Soomaaliga*. Qaahira.

Drake-Brockman, Ralph Evelyn (1912). *British Somaliland*. Hurst & Blackett. London

Georgi L. Kachits (2022). *Isha Cumar ka lulata*. Qaahira.

----- (2005). *Sentence particles in the Somali language and their usage in proverbs*.

----- (2022). *Qaamuuska Casriga ah ee Maahmaahda Soomaaliyeed — A Modern Dictionary of Somali Proverbs*. Katrineholm.

Markos Tekle Rike (2014) *State-Society Relations and Traditional Modes of Governance in Ethiopia: A Case Study of Sidama*. Adisababa.

Nancy Mellon (2000). *Storytelling with Children*. Wiltshire

Seyoum Hamesa (1997) *The Furra Legend in Sidama Traditions*. <https://www.academia.edu/>